# Su'aalaha Badanaa Nala Waydiiyo ee kayimaada Waalidiinta

**Waa maxay Nambarka Taleefanka Balarat?**
Taleefanada kuqoran barta waxaa loogu talagalay arimaha degdega ah kaliya. Si aad ulaxariirto xafiiska wayn ee Balarat, wac 720-424-2940. Saacadaha xafiisku furanyahay waa 7am ilaa 5pm.

**Cunugaygu ma awoodi doonaa inuu waco gurigga intuu joogo Balarat?**
Ardayda looma ogola inay dugsiga layimaadaan taleefanada gacanta ama u adeegsadaan taleefanka Balarat inay gurigga kuwacdaan. Hadii ay jirto arin degdeg ah, xubin kamid ah shaqaalaha ayaa degdeg kuulasoo xariiraaya. Arday badan, khibrada ay kabartaan habaynka ay joogaan dugsiga ayaa ah mid udhiganta mida ay kabartaan manhajka. Inay marar badan wacaan guriga waxay kasii dari karaa jamashada inay guriga uxiisaan.

**Anigu ma awoodi doonaa inaan cunugayga kusoo booqdo Balarat?**
Martida soobooqnaysa dugsiga, oo ay kujiraan xubnaha qoysku, lama ogola. Waxaan nahay xarun alabaabadeedu xiran yihiin si aan udifaacno dhamaan ardaydeena kusugan xarunta.

**Cunugaygu maheli doonaa cunto badan oo uu cuno?**
Haa! Dhamaan ardaydu waxay cunaan sadex cunto maalintiiba. Quraacda iyo cashada waxaa diyaarsha cunto kariyaheena khibrada uleh waxaana lagu kariyaa qaabka qoyska, ardayda ayaa heli kara rakaad haday wali baahan yihiin. Waxay sidoo kale helayaan cunto sajal ah maalintooda labaad ee safarka si ay ucunaan qadada socdaalka markay soo dhamaystaan wareegooda maalinta. Fadlan cunto sajal ah soosii maalintooda koobaad ee ay galayaan safarka Balarat.

**Kawaran hadii cunugaygu ubaahan yahay cuntooyin qaas ah ama uu cuntooyinka qaar kuqabo xasaasiyad?**
Jikadeena ayaa diyaarin karta cuntooyinka aan lahayn lawska, aan lahayn hilibka doofaarka, iyo cuntada khudaarta. Ardaydu waa inay layimaadaan cuntooyinkooda qaska ah wixii laxariira cuntooyinka kale oo dhan ee gaarka ah ayna kujiraan cuntooyinka xasaasiyada daran loogu talagalay. Hadaad su'aalo kaqabto cuntooyinka, fadlan wac xafiiska Balarat si aad ugala hadasho.

**Xagee ayaan kudirayaa lacagta safarka?**
Kaashka iyo jeegaga waxaa qaadaaya macalinka ardaygaaga. Jeega aad kubixinayso safarka cunugaaga waa inuu noqdaa miduu aqbalaayo dugsiga hoose ee cunugaaga. Haduu jiro baahi loo qabo caawimaad dhaqaale, arintaan waxaad si qarsoodi ah ugala hadli kartaa macalinka ama maamulaha. Qarashka ayaa daboolaaya kaliya cuntada cunugaaga mana jiraan wax kale oo lagu bixinaayo, dhamaan qarashaadka kale ee lagu maamulaayo Balarat waxay ka imaanaysaa Denver Public Schools.

**Maxay tahay in cunugaygu layimaado?**
Ku adeegso liiska lifaaqa kujira ee 'What to Bring & What Not to Bring (Waxa uu Ardaygu La imaanaayo iyo Waxa uusan La imaanayn)" si aad uga tilmaan qaadato. Fadlan kacaawi cunugaaga inuu alaabtiisa boorsaday kucabaysto ee adigu ka ucabayn. Waa muhiim inay ogaadaan waxa ay layimaadeen si aysan uga qasmin alaabaha ardayda kale. Sidoo kale, markaad cunuga lawadaagto shaqada cabaynta

alaabtiisa, waajibaadka ah inuu guriga kamaqnaado oo uu joogo Balarat waxay kabilaaban kartaa gurigga.

**Maxaa dhacaya hadan cunugaygu haysan wax uu sooqaato?**
Haduusan cunugaagu haysan waxa laga rabo inuu keeno, fadlan laxariir macalinka cunugaaga ee fasalka 5aad. wuxuu kala shaqayn doonaa shaqaalaha Balarat si ay ubuuxshaan baahiyaha cunugaaga.

**Yaa kashaqeeya shaqaalaha Balarat?**
Macalimiinta Balarat dhamaan waa shaqaalaha Denver Public Schools iyo macalimiintooda kuwaasoo soo maray baaritaano shaqsiyadooda lagu sameeyay. Dhamaan macalimiinteena waxay shahaado kahaystaan CPR iyo Wilderness First Aid waxayna qabaan tababar adag, maaha kaliya inay waxbaraan, laakiin sidoo kale inay kajawaabaan xaaladaha degdega ah. Si aad macluumaad badan uga ogaato shaqaalaheena, kafiiri webseetka Balarat oo ah http://balarat.dpsk12.org/staff/

**Maxaa dhacaaya hadii xaalad degdeg ah kadhacdo Balarat?**
Shaqaalaheena waxaa loo tababaray inay xaaladaha degdega ah kuxaliyaan xarunta dhexdeeda. Waalidiinta/masuuliyiinta ardayda waa lala xariiri doonaa hadii loobaahdo daryeel caafimaadna, isbitaalka noogu dhaw waxaa loosocdaa 25 daqiqo.

**Waa maxay meelaha laseexanaayo?**
Fasal kasta oo 5aad ah waxaa laseexinayaa albeeradeeda gaarka ah oo kulayliye leh. Albeergooyinkaas waxay leeyihiin meelaha ay gabdhuhu seexdaan iyo meelaha wiilashu seexdaan oo leh sariiro isosaaran. Qayb kasta oo jiif waxay leedahay musqul gudaha ugu taala. Macalinka fasalka iyo macalinka Balarat aya sidoo kale seexnaaya albeergada si ay ulasocdaan ardayda xaaladooda. Dadka qaangaarka ah midkasta wuxuu lahaanayaa qolkiisa ugaarka ah oo uu kaseexaanyo qaybta wiilasha ama gabdhaha midkood.

**Cunugaygu muxuu kubaranayaa safarka Balarat?**
Waxaan kala shaqaynaynay muddo sanado ah macalimiin, waalidiin, iyo maamulayaasha DPS naqshadaynta manhajkeena iyo nashaadaadkeena. Waxaan waafajinay manahjkeena heerarka waxbarashada ee Colorado si gacan looga gaysto taageerida iyo iskuxirka waxa ardaydu kubartaan fasalada. Waxaan balan qaadaynaa, inta ardaydu baashaalayaan, sidoo kale wax bay baranayaan, iyo waxyaabo kale oo kuwaaso kaladuwan.